

Maqaalka warsidaha K-12

Meel dhigo rasiidhyada Lagu iibsaday Agabyada Dugsiga!

Minnesota Department of Revenue waxay siisaa laba faa'iidooyin cashuureed oo qiimo leh waalidiinta u gada agabka dugsiga ardaydooda dhigta K-12: Dhibcaha Waxbarashada iyo Hoos uga dhigida Canshuuraha ay bixiyaan dadka ay arday u dhigtaan K-12 (K-12 Education Credit and Subtraction).

Dheefahani waxay yareyn karaan canshuurta ay bixiyaan waalidiinta si ay u kordhiyaan lacagta usoo laabato, laakiin waxaa heli kara oo kaliya dadka haysta rasiidhaddooda. Dheefahani waxaa u qalmi kara dadka iibsasada inta badan agabyada dugsiga, safarada dibadda, iyo qalabka muusiga ee kooxda dugsiga.

Inta badan waalidiinta Minnesota waxay u qalmaan hoos u dhigida canshuurta ay bixiyaan dadka ay ardaydoodu dhigtaan K-12 (K-12 subtraction), taas oo yaraynayso dakhligooda la cashuuri karo. Waalidiinta ay saaran tahay xaddidaaddaha dakhliga qaarkood waxay sidoo kale u qalmi karaan dhibcaha K-12, taas u soo celin karta ilaa 75% kharashaadkooda – xitaa waalidiinta aan lagu lahayn wax canshuuro ah. Booqo websaydka Revenue si aad u hesho tafaasiil dheeraad ah.